


Hawlaha muddo bilo ah ee Xagaaga




Juun 2010

- Qaado oo raac bas
- Dabaal aad oo ka hadal ammaanka biyaha
- Sawir oo samee jidka baxsiga oo qabo carbis dab
- Sheeko abuur oo sawir sawirada sheekadaada
- U ogolow ilmaahaaga inuu salaxo miiska cashada
- Gee ilmaahaaga jardiinada. Ku naso hadhka oo sheeko wada-akhriya
- Ilmaahaagu ha u sameeyo kaadh qof gaara
- Ku dar midabeeyaha cuntada biyo saabuun leh oo ku ciyaara
- Ilmaahaaga la lugee oo doondoona waxyaabo qurux leh
- Dhagayso muusig oo qoob-ka-ciyaar, ilmaahaagu ha istiriijiyo markuu muusigu joogsado
- Duurbax la aad ilmaahaaga iyo qoyska
- Caruusad ka samee kartoon kiish warqad ah "Paper Bag Puppet"
- Gee ilmaahaaga maktabadda oo ka soo qaata 3 buug oo aad guriga ku akhridaan




Juulaay 2010

- Lugayn aad oo dhagayso codadka hareerahaaga
- Wakhtiga hurdada, weydii ilmaahaag waxay tahay qaybaha maalinta ee ugu jecel yahay
- Samee liistada adeegsiga si uu ilmaahaagu ugu "akhriyo" dukaanka
- Samee qoosh bur lagu ciyaaro: 1 c. bur, $\frac{1}{2}$ c. biyo, 2T saliid, 2Ts kareemada tartarka, midabeeyaha cuntada. Ku kari dab dhexdhexaad ah
- Lugayn aad oo ka hadal midabyada
- U ogolow in ilmaahaagu kaa gargaaro qorshaha iyo diyaarinta cunto
- Magacow waxyaabo ka bilaabma isla xaraf ku jira ilmaahaaga magaciisa
- Uga sheeke ilmaahaaga sheekooyin adiga kugu sa'absan markaad yarayd
- La qoob-ka-ciyaar ilmaahaaga
- Kaadh ama waraaq u dir saaxiib ama ehel. Qor wuxu ilmaahaagu yidhaahdo dabeedna ha u saxeexo siduu rabo
- Sawiro la samee ilmaahaaga
- Buug akhri dabeedna sheeko cusub ka samee isla dadka ku jiray sheekada
- La samee ilmaahaaga saladh ka samaysan midho



Ogost 2010

- Samee liisto 5 siyaabood oo ilmaahaagu farxad ugu samayn karo noloshada. Ku dheji meel oo u akhri ilmaahaaga
- Tag xeebta oo samee qasriyada burciidda ama biyaha ku wada boodbooda
- Akhri sheeko oo ku bedl magaca ilmaahaaga qof ku jira sheekadaas
- Ilmaahaaga la daawo daruuraha. Hel qaababka xayawaanka, dadka, walxaha lagu ciyaaro



iyo dhammaan waxyaabaha ku jira.

Duur-bax ku samee garoonka-ciyaaraha ee dugsiga degaanka. Ku ciyaar walaxfa la fuulo, fiiri dariishadaha qaolka fasalka, oo ka hadal sida uu dugsigu yahay

- Bar ilmaahaaga heeso ka soo jeeda carruurnimadaadii
- Maalin cadceed jirto ku wada ciyaara hadhka
- Teendho (taanbuug) ka samee bustayaasha (gudaha ama dibedda)
- Tus ilmaahaaga sida lambarada loo isticmaalo
- Booqo maktabadda ilmaahaaga. Akhri buugaagtaada sidaad diyaar ugu noqon lahayd dugsiga xanaanada ilmaha "kindergarten"
- U sheeg ilmaahaaga erayada jacaylka iyo dhiirigelinta; "Waxaad tahay caawiye weyn, mahadsanid, waan ku jecelahay"

